

Codsadaha SNAP Qaaliga Ahow,

Codsashada ama qaadashada SNAP **makaa** dhigeysa qof ceyr qaata **mana** lagu tixgelin doono go'aminta qof ceyr qaata. Codsashada ama qaadashada SNAP **ma** saameyn doonto awoodaada:

- **Aad kusii joogeysid Mareykanka,**
- **Aad kuheleysid Green Card (Kaarka Deggenaanshaha Mareykanka) / Xaalada Deggenaanshaha Joogtada ee Sharciga ah,**
- **Aad kuhaysaneysid Green Card (Kaarka Deggenaanshaha Mareykanka) / Xaalada Deggenaanshaha Joogtada ee Sharciga ah, ama**
- **Aad ku noqoneysid muwaadin U.S. ah.**



Waxaad sidoo kale adiga oo matalaya u sameyn kartaa codsiga SNAP dadka soogalootiga ah ama muwaadiniinta U.S. ee qoyskaada katirsan, xitaa adiga haddaaddan rabin inaad naf ahaantaada u codsato, iyada oo aan saameyneynin xaaladaada ama xaaladooda soogalootiga. Tusaale ahaan, haddii waalid uusan uqalmin SNAP sababo la xariiro xaaladooda soogalootiga, wali waxa ay usameyn karaan codsiga carruurtooda uqalma. Xafiiska SNAP looma oggola inay weydiiyaan dukumiintiyada socdaalka dadka aanan codsaneynin inay iyaga helaan gunnooyinka.

Haddii aad ubaahan tahay kaalmo cunto ah, oo adiga ama xubnaha katirsan qoyskaada ay uqalmaan, fadlan adiga codso SNAP ama u codso qoyskaada. Usamee sida danta u ah qoyskaada!

Wixi xog dheeraad ah oo la xariira xogta guud ee socdaalka oo ah Af-Ingiriisi ama Isbaanish, fadlan ka wac USCIS halkan 1-800-375-5283. Xogta guud ee kusaabsan SNAP, fadlan wac 1-800-221-5689 (kaliya ah Af-Ingiriis) ama 202-720-2791 (Af-Ingiriis iyo Isbaanish) si laguugu xariiriyo khadka caawinta SNAP ee Gobolkaada.